

BUUGA III

Xuquuqda caruurta

WAA MAXAY QIIMEYNTA WAXA UGU WANAAGSAN EE LAGUU QABAN KARO?



SOO DHAWWOOW!



Sheekadan waxay ku saabsan tahay afar dhallinyaro — sida adiga oo kale ah.

Waxay si nabad ah ku yimaadeen Yurub ka dib safar dheer.

Qaar ka mid ah dhallinyarada ayaa kelidood yimid. Qaar kalena waxay la yimaadeen qoys. Waxay qabaan su'aalo badan — waxaana ka caawinaya dadka ka shaqeeya meesha ay ku nool yihiin.



Sheekadan sidoo kale adiga ayey ku caawin kartaa!

Waxaad baran doontaa:

- **Qiimeynta danaha ugu fiican** waxay ka dhigan tahay
- waxa aad filan karto
- sababta ay muhiimka kuugu tahay inaad ka qayb qaadato oo la shaqeyso saraakiisha
- yaa ku caawin kara?
- wax ku saabsan xuquuqdaada

Waxaad akhrrin kartaa sheekadan:

- keli
- la jiro saxiib
- lajiro qof halkaan ka shaqeeya






Qaado wakhtigaaga. Waa SAX inaad joojiso oo dib uga soo noqoto mar kale.

Haddii wax ay adag yihiin in la fahmo, **weydii qof kuu sharxa**.

Masuulkaaga, shaqaalaha bulshada ama qareenka ayaa kaa caawin kara.

DHAMAADKA, WAXAAD KA HELI DOONTAA:

-  bog leh macluumaad deegaanka
-  su'aalo xiiso leh
-  meel aad ku qori karto su'aalahaaga iyo inaad ku darto xiriirro wixtarka leh



Carruurta ka yar 18 sano oo keligood yimaada, waxaa loo magacaabi doonaa masuul. Qaar ka mid ah waddamada, masuulka waxaa sidoo kale loogu yeeraa wakiil.

Sidoo kale, qaar ka mid ah waddamada, **codsashada magangelyada** waxaa loo yaqaannaa **codsashada ilaalinta caalamiga ah**.




Ugu dambeyntii, ogow in dhammaan adeegyada lagu bixiyo xarumaha soo dhawaynta ee aad joogto ay yihiin bilaash. Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha uu kaa codsado lacag, la hadal sarkaal aad ku kalsoon tahay ama ilaaliyahaaga.

LA KULAN SHAQSIYAADKA SHEKADAAN KU JIRA

Mohamed

Waxaan ahay 17 sano jir. Waan faraxsanahy inta badan. Waxaan jeclahay inaan caawiyo qoyskeyga iyo asxaabteyda marka aan awoodo. Waxaan keligay yimid dhowr toddobaad ka hor waxaana raadinayaa awoowgay. Waxaan xiiseynayaa inaan bilaabo shaqo.



Ahmed

Waxaan ahay 15 sano jir Waxaa ila socday walaashay weyn Jasmine, oo ila jirtay tan iyo markii hooyaday geeriyootay. Waxaan jeclahay inaan waqti la qaato dadka iyo inaan saaxiibo cusub sameeysto. Runtii waxaan jeclaan lahaa inaan ku noqdo iskuulka sida ugu dhaqsaha badan. Waqti xaadirkan, waxaan baranayaa luqadda deegaanka halkan.



Jasmine

Waxaan ahay 24 sano jir Waxaa ila socday walaalkay, Ahmed, oo aan ugu dadaalo sidii ugu wanaagsan ee aan u daryeeli karo. Waxaan nimid dhowaan waxaana isku dayeynaa inaan ku biirno adeerkay oo muddo ku noolaa Yurub. Waxaan jeclahay ciyaaraha waxaana aad ugu fiicanahay kubadda cagta.



Adam

Waxaan jahay 9 sano jir. Waxaan halkan joogaa keligay. Hada, waxaan goaansadey inaan hadlin. Waxaan la soo kulmay waxyabo xun oo badan intaan halkaan imaan kahor. Waxaan u baahanahay waqti ka hor inta aan mar kale hadlin. Laakiin waan caqli badanahay oo waan fahmaa wax walba. Waxaan ahay dhageyste wangsana waxaana rabaa inaan dugsi tago. Waxaan jeclahay dhammaan saaxiibada cusub ee aan illaa hadda samaystay.



Ms Ines

Waxaan ahay masuul ka shaqeeya xaruntan soo dhawaynta. Waxaan isku dayaa inaan taageero dhammaan carruurta iyo dhallinyarada codsanaya magangelyada sida ugu wanaagsan ee aan awoodo. Waxaan jeclahay cunto karinta, wayna i farxad gelisaa marka qof walba mashquul yahay oo firfircoon yahay. Jimicsigu wuxuu dhammaanteen naga dhigaa kuwo qaba caafimaad jidheed iyo maskaxeedba.



Mr Fred


Waxaan ahay la-taliye sharci, taasoo ah nooc qareen ah. Waxaan halkan kala shaqeeyaa asxaab badan oo si fiican loo tababaray. Waxaan siiyaa macluumaad iyo taageero dhammaan codsabayaasha magangelyada arrimaha sharciga iyo codsiyada magangelyada. Waxaan jeclahay xirashada funaanado midabo leh oo fariin ku qoranatahy.




Mahad weyn ayaa u sugnaatey dhammaan dhalinyarada codsaday magangalyada ee akhriyay sheekadan ka hor inta aan la daabicin iyo kuwa ka caawiyey in si qurux badan loo dhammeeyo.

Waxay sidoo kale ka caawiyeen doorashada magacyada shaqsiyada waaweyn.


Mahad ayaa sidoo kale u sugnaatay mas'uuliyiinta Malta iyo Netherlands oo taageeray doodaha lala yeeshay dhallinyarada.



MS INES...



...MA HAYSAA WAQTI AAD KU SHARAXDO WAXA AY KA DHIGAN TAHAY 'DANTA UGU FIICAN EE ILMAHA'?



DABCANI! XASUUSO, ILMUHU WAA QOF KA YAR 18 SANO.



HAA!

QAANGAADH KASTA OO ILMAHA DARYEELA, SIDA WAALIDKA AMA MASUULKA, WAA INAY MAR WALBA KU HOR MARIYAAN ADIGA. ILMUHU WUXUU XAQ U LEEYAHAY NOLOL NABDOON OO CAAFIMAAD LEH, CUNTO, ISKUUL, WAQTI CIYAARO IYO GOYS JECEL.



DADKII KU DARYEELA, OO AY KU JIRAAN MAS'UULIYIINTA GO'AAMADA KULU GAADHA, WAA INAY SIDOO KALE DHAGEYSTAAN RAJADAADA IYO WELWELKAAGA.

TIXGELINTA DANAHA UGU FIICAN EE ILMAHA WAXAY KA DHIGAN TAHAY SAMAYNTA DOORASHOYINKA UGU FIICAN IYO HELIDDA XALKA UGU FIICAN SI ILMUHU U AHAADO MID NABDOON, FARAXSAN OO CAAFIMAAD QABA.





DHALLINYARADA SIDA ADIGA OO KALE EE
MAGANGELYO KA RAADINAYA YURUB
BADANAA KELIGOOD BAY YIMAADAAN OO
WAXAY U BAAHAN YIHIIN TAAGEERO.



MASUUL MA ISKU DAYO INUU BEDDELO QOYSKAAGA,
LAAKIIN WUXUU KU TAAGEERAA INTA AAD KELIGA
TAHAY. WAXAAN HUBINAA IN DANAHAAGA UGU FIICAN
LA ILAALIYO ILAA AAD UGA BAAHNAAN WEYDO
CAAWIMAAD.

...LAAKIIN MAXAA DHACAYA
HADDII ILMUHU YIMAADO
ISAGA OO LA SOCDO
XUBNAHA QOYSKA?



DANTA UGU FIICAN EE ILMO KASTA WAA
MUHIIM. QOF KASTA OO QAANGAADH AH OO
ILMAHA DARYEELAYA WAA INUU TIXGELIYAA
WAXA UGU FIICAN IYAGA. LAAKIIN... MAR
WALBA MA FUDUDA. MARARKA GAAR
DARYEELAYAASHU WAY LA DHIBTOON KARAAN.
SHAQAALAHA BULSHADA EE HALKAN JOOGA
WAXAY SIIN KARAAN TALO.

WAXAAD SIDOO KALE LA HADLI KARTAA SHAQAALE
BULSHO, HADDII QOYSKAAGU UU MASHQUULSAN
YAHAY AMA AAN SI HABBOON KUU DARYEELIN.
DHAMMAAN WADA HADALLADANI WAA KUWA
QARSOODI AH!



WAXAAD LA WADAAGI KARTAA DHAMMAAN
FIKIRKAAGA IYO DAREENKAAGA MASUULKAAGA.



SIDOO KALE... MAS'UULIYINTU
WAXAY MARARKA QAAR GAADHI
KARAAN GO'AANNO SAAMEYNAYA
NOLOSHIINA. SIDAA DARTEED,
MASUULKA AYAA KAA CAAWIN
DOONA INAAD LA XIRIIRTO SI LOO
HUBIYO IN CODKAAGA LA MAGLO.



MA II SHEEGI KARTAA
TUSAALE GO'AAN AY TAHAY
INAY GAADHAAN?



HAA. GO'AANNADU WAXAY
NOQON KARAAN WAXA
DARYEEL CAAFIMAAD EE AAD
HELI LAHAYD, MEESHA AAD KU
NOOLAAN LAHAYD IYO CIDDA
AAD LA NOOLAAN LAHAYD.

LAAKIIN WAXAAN U MALEYNAYAA INAAN DA' WEYNAHAY
OO AAN GO'AANKA ISKEY U GAADHI KARO! WAXAAN
RABAA INAAN LA JOOGO AWOOWGAY OO IGA LUMAY
INTII INTII AAN SAFARKA AHAA.



WAAN FAHMAYAA. WAA
SIDAAS, ILAALIYEYAASHU
WAY KU DHAGEYSANAYAN.

WAXAY SI DHAB AH U QAATAAN ARAGTIDAADA WAXAYNA KA CAAWIYAAN MAS'UULIYIINTA INAY FAHMAAN XAALADDAADA GAARKA AH... WAXAYNA GO'AAMIYAAN WAXA KUU FIICAN.



SIDEE AYAY TAAS U SAMEEYAAN XAQIIGATAN...?



SARAAKIISHA TABABARAN AYAA KU WAYDIIN DOONA SU'AALO, SI AY U BARTAN INTII KARAANKOODA AH XAALADDAADA.




JAWAABAHAAGA WAXAY KA CAAWIN DOONAAN INAY GO'AAMIYAAN WAXA KUGU HABBOON ADIGA. XAALADDAADA, AHMED, MAS'UULIYIINTU WAXAY MARKA HORE HUBIN DOONAAN HADDII AWOOWGAA...

...UU CAAFIMAAD GABO OO UU LEEYAHAY XOOG KU FILAN INUU KU DARYEELO...



...KU NOOL YAHAY MEEL NABAD AH...




...UU KU SIIN KARO CLINTO, DHAR IYO WAXBARASHO...



...UU SI WANAAGSAN KUULA DHAQMAY MARKII HORE.







SAX... DHAMMAAN
TAN WAA MUHIIM!




HAA! TANI WAXAY KA HORTAGTAA
DHIBAATOYINKA MUSTAQBALKA. MARARKA
GAAR, WAXA ILMUHU RABO WAKHTI KASTA
MA AHA WAXA UGU FIICAN DANAHIISA.



WAAN FAHAMSANAHAY...
MAS'UULIYINTU WAXAY
RABAAN INAY SAXAAN...




XAQIIQATAN!



HADDA WAAN FAHAMSANAHAY
SABABTA AY II WAYDIINAYAAN
SU'AALO BADAN OO KU
SAABSAN AWOOWGAY...




HAA, WEYDIINTA SU'AALO GAAR AH, GAAR
AHAAN MARKA GO'AANNO MUHIIM AH LA
GAADHAYO, WAXAA LOO YAQAANAA
QIIMEYNTA DANAHA UGU FIICAN .



LA WADAAG INTII AAD AWOODO.

XASUUSO, QIIMEYNTAN WAXAY DHICI KARTAA WAQTIYO KALA DUWAN, KULAN KA BADAN HAL IYO SABABO KALA DUWAN. XAALADDAADA, SI LAGUU MIDEEYO XUBNAHA QOYSKAAGA, TAAS OO SIDOO KALE LOOGU YEERO ISKU KEENISTA QOYSKA ...

...OO AH HABKA LAGU KEENAYO XUBNAHA QOYSKA OO KALA LUMAY. MA KA FIKIRI KARTAA TUSAALE KALE?




...MARKA ILMUHU KU NOOL YAHAY MEEL AAN NABAD AHEYN.

XAQIIQATAN!

MAXAAD KA WADDAA 'AAN NABAD AHEYN'?



NASIIB DARRO, MA AHA DHAMMAAN CARRUURTA KUWO NABAD GABA, GAAR AHAAN MARKA AY KELIGOOD YIMAADAAN.



QAAR KA MID AH DADKA AYAA LAGA YAABAA INAY ISU MUUJIYAAN KUWO NAXARIIS LEH KADIBNA SI XUN U DHAQMAAN AMA ISKU DAYAAN INAY KA FAA'IIDEYSTAAN KELINIMADAADA.

MARARKA QAAR, XITAA XUBNAHA QOYSKA AYAA NOQON KARA KUWA SI XUN KUULA DHAQMA.

WAA MUHIIM INAAD WAXYAABAHAN LA WADAAGTO SARAAKIISHA, SI AY KUU CAAWIYAAN.



SARKAALKA I WAYDIYAY SU'AALAHA WUXUU AHAA MID AAD U NAXARIIS BADAN...



HAA, BADANAA WAA SHAQAALAHA BULSHADA AMA DHAKHTARKA MAANKA CARRUURTA.



TANI WAXAY AHAYD MID XIISO LEH OO WAXTAR LEH. AAD BAAD U MAHADSANTAHAY!



ADIGAA MUDAN! HA JOOJIN WEYDIINTA SU'AALAHA!

MUHIIM AH

Gudaha wadankaan

Hay'adda bixisa meel ammaan ah oo lagu noolaado, taas oo sidoo kale loo yaqaano **xarunta soo-dhaweynta**, waa: _____

Haddii aan rabo inaan wax badan ka ogaado:

- adeegyada guud ee la ii siin karo, sida dhar ama alaabta nadaafadda, waxaan la xiriiri karaa ama tagi karaa: _____
- waxaan sameeyaa marka aan xanuunsado, waxaan la xiriiri karaa: _____

- sida loo tago iskuulka, loo barto xirfad ama luqadda deegaanka, waxaan la xiriiri karaa: _____

Hay'adda mas'uulka ka ah ka shaqeynta **codsigeyga magangelyada** waa: _____

Masuulkayga magiciisa waa: _____

Haddii aan xiiseynayo inaan wax badan ka barto **qiimeynta danaha ugu fiican**, goorta ay dhacdo iyo waxa lagu sameeyo macluumaadka aan la wadaago, waxaan la hadli karaa masuulkayga ama hubin karaa: _____

MUHIIM AH

Gudaha wadankaan

Waxaan la xiriiri karaa la-taliye sharci oo bilaash ah si aan wax badan uga barto habraaca magangelyada iyo mowduucyada la xiriira. Tani, waxaan la xiriiri karaa: _____

Haddii qof halkan ka shaqeeya, sida saraakiisha, la-taliyayaasha sharciga, shaqaalaha bulshada ama ilaaliyahayga si xun iila dhaqmaan, waxaan cabasho samayn karaa oo waxaan la xiriiri karaa:

Xaalad degdeg ah, waxaan la xiriiri karaa ambalaaska lambarka _____ ama lambarka booliska: _____

Akhbaarta kale ee muhiimka ah: _____

KADIS

Waxaan hubinayaa aqoontayda ku saabsan waxa aan ka bartay helitaanka magangelyada inta lagu jiro baaritaanka.

✓ Sax jawaabaha saxda ah

- 1 Tixgelinta danaha ugu fiican ee ilmaha waxay ka dhigan tahay...
- a. Mas'uuliyiintu waxay i dhageystaan aniga iyo masuulkayga si ay u fahmaan dareenkayga, baahiyahayga iyo aragtidayda, si ay u gaadhaan go'aanno iigu habboon.
- b. Cidna ima dhageysato
-
- 2 Si aan wax uga bartaan baahiyahayga iyo waxa iigu fiican xaaladaha gaarka ah, mas'uuliyiintu waxay i waydiin doonaan su'aalo inta lagu jiro qiimeynta danaha ugu fiican ee ilmaha .
- a. Run
- b. Been
-
- 3 Maxay mas'uuliyiintu u sameeyaan qiimeynta danaha ugu fiican?
- a. Si loo helo xalka ugu fiican marka go'aanno waaweyn la gaadhayo, sida meesha aan ku noolaan doono iyo cidda aan la noolaan doono.
- b. Sababtoo ah waxay jecel yihiin inay hadlaan.
-
- 4 Danta ugu fiican ee ilmaha waxay khuseysaa oo kaliya carruurta keligood yimaada oo aan waalid la socon.
- a. Run
- b. Been
-
- 5 Saraakiisha ka shaqeeya meesha aan ku noolahay waxay si joogto ah iigu hubin doonaan aniga iyo masuulkayga haddii aan leeyahay baahiyo cusub.
- a. Run
- b. Been

Kadiska jawabhooda

Suasha 1: a Suasha 2: a Suasha 3: a Suasha 4: b Suasha 5: a

QORAALLO

QORAALLO

SOMALI

Buug-yarahan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuru xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalka, waxaana keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, EUAA taas oo loogu talagalay dalaalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025

